IIB MA GALO

الجريدة الرسمية

FAAFINTA RASMIGA AH

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

الجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 6aad Muqdisho 25 Luulyo 1978 L. 2 R 7

**Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J.D.S.**

FAAFINTA BIL SOO BAXA جريدة شهرية

**QIIMADU:** waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanadii waa Sh. 100 Somaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qortitaanku F.R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

# KOOBNIIN

## QAYBTA KOWAAD

SHARCI L. 28 ee 16 Juunyo 1978 Dhismaha Wakaaladda Hindisaha Soomaaliyeed. Bogga 483

## QAYBTA LABAAD

XEER MADAXWEYNAHA JDS. L. 62 ee 25 Maajo 1978 Nidaamka khidmadda hawlaha ay qabato Wakaaladda Hindisaha Soomaaliyeed. » 505

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 63 ee 25 Maajo 78, Iskaashiga ka dhexeeya Wakaaladda Hindisaha Soomaaliyeed iyo Kulliyadda Injineeriyadda. » 488

## QAYBTA SEDDEXAAD

### TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH

W. M.

Wakaaladda Madbacadda Qaranka — Muqdisho.

SHARCI L. 28 ee 16 Juunyo 1978. Dhisidda Wakaaladda Hindisaha Soomaaliyeed..

MADAXWEYNAHA

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

ISAGOO ARKAY : Warqaddii Koowaad, Labaad iyo tii Saddexaad ee Kacaanka ;

ISAGOO ARKAY : Sharciyada lamb. yihiin 17, 18 iyo 19 ee soo baxeen 1da Luulyo 1976uu

ISAGOO AQOONSAN : Inay tahay lagama maarmaan in la dhiso Wakaalad cusub oo la yiraahdo Wakaaladda Hindisaha Soomaaliyeed taasoo loo xilsaaray diyaarinta Brojeetooyinka Mashaariicda Injinyeeriyada ee Dalka laga hirgelinaayo.

ISAGOO TIXGELINAAYA: Go'aankii Guddiga Siyaasadda iyo Golaha Wasiirrada ee X.H.K.S.

WUXUU SOO SAARAYAA :

Sharciga soo socda :

## QAYBTA 1AAD

## HABKA GUUD

### Qodobka 1aad

### Dhismaha Wakaaladda

1. Waxaa la dhisayaa Wakaalad cusub oo la yiraahdo Wakaaladda Hindisaha Soomaaliyeed (Somali Engineering Consulting Agency) taasoo hoos imaaneysa Wasaaradda Hawlaha Guud.

2. Wakaaladdu waxay tahay mid madax bannaan oo leh jiritaan iyo Shakhsiyad Sharciyeed si ay u fuliso hawlaheeda.

3. Wakaaladdu waxay u hoggaansami doontaa Sharcigaan iyo Sharciyada kale ee soo socda :

b) Sharciga Lr. 16 soona baxay 1dii Abriile 1970 kuna saabsan Wakaaaladaha Madaxa Bannaan iyo wixii beddelaad ah oo ka dambeeyey ;

t ) Sharciga Lr. 36 taariikh 22 Abriile 1972 ee ku saabsan Shaqaalaha Wakaaladaha Madaxa Bannaan ;

j ) Sharciga Lr. 58 taariikh 31 Luulyo 1972 ee ku saabsan Lacagta Wakaaladaha Madaxa Bannaan ;

Qodobka 2aad

## Xarunta iyo Laamaha Wakaaladda

Xarunta Wakaaladdu waxay ahaaneysaa Magaala Madaxda Muqdisho, waxayna ku yeelan kartaa Laamo Gobollada iyo Degmooyinka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga ee Soomaaliya haddii loo baahdo.

Qodobka 3aad

## Ujeeddooyinka

Ujeeddooyinka Wakaaladdu waxay yihiin :

— Inay diyaariso Brojeetooyinka Mashaariicda Injinyeeriyada laga hirgelinaayo Dalka oo ay Dawladdu leedahay ama Wakaaladaha Madaxa Bannaan.

— Inay la socoto, kormeerto iyo talo ka bixiso hawlaha dhismaha ee ku saabsan Injinyeeridda ee laga hirgelinaayo Dalka

— Inay deristo oggolaansho farsamadeedna ka bixiso Brojeetooyinka mashaariicda laga hirgelinaayo Dalka oo ay Dawladdu ama Wakaaladaha Madaxa Bannaan ay leeyihiin kuwaasoo iyadu toos u sameynin ;

— Inay sahmiso alaabta dhismaha ee laga helayo Dalka kuna taliso horumarintooda ;

— Inay ku samayso tijaabada ciidda (Soil analysis) iyo alaabta dhismaha.

Qodobka 4aad

## Awoodda Wakaaladda

Wakaaladdu waxay awood u leedahay iney fuliso hawsha loo xilsaaray oo ku xusan qodobka 2aad ee Sharcigan iyadoo ka qayb galaysa tartannada ka soo baxo Hay'adaha Caalamiga ah iyo iney heshiisyo gaar ah oo tartan la'aan ah la sameyso dhinacyo kale.

Qodobka 5aad

## Kormeeridda iyo Ilaalinta guud

Kormeeridda iyo Ilaalinta guud ee Wakaaladda waxaa yeelanaya Wasiirka Hawlaha Guud.

## XUBNAHA WAKAALADDA

### Qodobka 6aad

### Maareeyaha Guud

Wakaaladdu waxaa madax u noqonaya Maareeye Guud, waxaana lagu magacaabayaa Dekreeto uu soo saaro Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya isagoo tixgelinaaya talada Wasiirka Hawlaha Guud iyo oggolaanshaha Golaha Wasiirrada.

### Qodobka 7aad

### Agaasimayaasha

1. Wakaaladdu waxay yeelaneysaa Waaxyo, Qaybo iyo Laamo.

2. Waaxyaha Wakaaladda waxaa Madax u noqonaya Agaasimayaal, waxaana lagu magacaabayaa Dekereeto uu soo saaro Madaxwaynaha Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliya, isagoo tixgelinaaya talada Wasiirka Hawlaha Guud iyo tan Maareeyaha Guud ee Wakaaladda.

### Qodobka 8aad

### Hawsha Maareeyaha Guud

1. Maraayaha Guud waxaa loo xilsaaray, isagoo ka Wakiil ah Wakaaladda, fulinta ujeedooyinka loo dhisay Wakaaladda, hawsheeduna waxay tahay:

b) Inuu saxiixo heshiisyada ay Wakaaladdu dhinac ka tahay

t) Waxa uu mas'uul ka yahay habka maamulka shaqada Wakaaladda isagoo awood u leh inuu qaado tillaabo kasta oo ku haboon socodsiinta hawsha Wakaaladda;

j) Waa inuu wixii go,aan ah ee ku saabsan Siyaasadda guud ee Wakaaladda ka haystaa oggolaasho Wasiirka Hawlaha Guud ;

x) Wuxuu mas'uul ka noqonayaa lacagta Wakaaladda ;

kh) Waa inuu si hagar la'aan ah ula shaqeeyaa Unugga Xisbiga H.K.S. iyo Guddiga Shaqaalaha ee ka dhisan Wakaaladda ;

d) Waa inuu mas'uul ka noqdaa kor u qaadidda Xirfadaha iyo tababarada shaqaalaha Wakaaladda.

2. Marka uu maareeyaha Guud ka maqnaado shaqadiisa sabab kasta ha ahaatee waxaa meeshiisii loo dhiibayaa Agaasime ka tirsan Wakaaladda uu Wasiirku Ku-sime ahaan u soo magacaabo.

## Qodobka9aad

## Rasamaalka Wakaaladda

Rasamaalka Wakaaladdu wuxuu ka koobnaan doonaa :

1. Lacag Sh. So. 3.000.000 oo ay Dawladda Soomaaliyeed siiso.
2. Wixii hanti ah oo ugu deeqaan dawlado kale ama Ururro Caalami ah.
3. Wixii lacag ah oo ka soo gala hawsha ay qabato Wakaaladda.

## Qodobka 10aad

## Miisaaniyadda Wakaaladda

1. Maareeyaha Guud marka ay tahay 30ka Oktoobar ama inta ka horreysa sannad kasta waa inuu isku dubbaridaa miisaaniyadda sannadka maaliyadda soo galaysa isaga oo ku faahfaahinaayo kuna muujinaya lacagta soo geli doonta ama ka bixi doonta wakaaladda sannadka soo socda, waxaanu hordhigi doonaa Wasiirka Maaliyadda iyo kan Wasaaradda Hawlaha Guud si loo oggolaado.

2. Miisaaniyadda lacagta sannadka ee Wakaaladda waa inay ahaataa mid la socota oo tixgelisa miisaaniyadda Dawladda.

## Qodobka 11aad

## Xiritaanka Xisaabaadka

1. Maareeyaha marka ay tahay 31 Maarso ama inta ka horreysa sannadkasta waa inuu isku dubbaridaa Xiritaanka Xisaabaadka ee sannadka la soo dhaafay isagoo isku hagaajiyey bandhiggii macaashka iyo khasaaraha Wakaaladda, wuxuuna u gudbinayaa Wasaaradda Maaliyadda iyo tan Hawlaha Guud.

2. Wasiirka Wasaaradda Hawlaha Guud waxaa uu awood u leeyahay, isaga oo la tashanaya Wasiirka Maaliyadda inuu oggolaado Xiritaanka Xisaabaadka wuxuuna amar ku soo bixin karaa in lagu qoro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda iyadoo kharajka ay bixinayso Wakaaladdu.

## Qodobka 12aad

### AMMAAH

Wakaaladdu iyadoo haysata oggolaanshaha Wasiirka Hawlaha Guud waxay ka amaahan kartaa lacag Bankiyada iyo Hay'adaha Dalka iyo dibeddaba si ay u fuliso hawlaha loo xilsaaray

## Qodobka 13aad

### Ka reebid

Sida uu dhigayo qodobka 17aad ee Xeerka Shaqaalaha Dawladda, Maareeyaha Guud, Agaasimayaasha waaxyaha iyo iyo Shaqaalaha kale ee Wakaaladdu ma gali karaan ganacsi amase Farsamo lid ku ah danaha iyo ujeedooyinka Wakaaladda.

# QAYBTA IIIAAD

# QODOBO UGU DAMBAYS AH

## Qodobka 14aad

### Xeer Nidaamiye

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Demoqraadiga Soomaaliya wuxuu awood u leeyahay isagoo tixgelinaaya talada Wasiirka Hawlaha Guud inuu soo saaro Xeer Nidaamiye lagu fulinaayo Sharcigan.

## Qodobka 15aad

### Dhaqan gelid

Sharcigani waxaa lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda, wuxuuna dhaqan galayaa taariikhda uu ku soo baxo.

Muqdisho 16 Juunyo 1978

(Jaalle S. Gaas Maxamed Siyaad Barre)

MADAXWEYNAHA

JAMHUURIYADDA DIMOQARAADIGA SOOMAALIYA

## QAYBTA LABAAD

XEER MADAXWAYNAHA J.D.S. L. 62 ee 25 Maajo 1978, Ni daamka khidmadda Hawlaha ay qabato Wakaaladda Hindisaha Soomaaliyeed.

MADAXWEYNAHA

J. D. S.

ISAGOO ARKAY: Xaashida 1aad 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka.

ISAGOO ARKAY: Sharciga lam. yahay 17, 18 iyo 19 ee 1.7.1976.

ISAGOO ARKAY: Sharciga lagu dhisay Wakaaladda Hindisaha Soomaaliyeed.

ISAGOO AGOONSADAY: Inay tahay lagama maarmaan in la dejiyo nidaam saamaynayo khidmadda Hawlaha ay qabato Wakaaladda Hindisaha Soomaaliyeed;

ISAGOO TIXGELINAYA: Talada uu soo jeediyeey Wasiirka Wasaaradda Hawlaha Guud;

ISAGOO TIXGELINAYA: Go'aankii Guddiga Siyaasadda iyo Golaha Wasiiradda.

WUXUU SOO SAARAYAA :

Xeerka soo socda:

**Qodobka 1aad**

Waxaa la oggolaaday Nidaamka khidmadda la xiriirta Hawlaha ay Wakaaladda Hindisaha Soomaaliyeed qabato ee ku lifaaqan Xeerkan.

**Qodobka 2aad**

Xeerkan waxaa lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda Soomaaliyeed, wuxuuna dhaqan galayaa maalinta uu ku soo baxo.

Muqdisho 25 Maajo 1978

(Jaalle S. Gaas Maxamed Siyaad Barre)

MADAXWEYNAHA

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

**Jaalle Maxamed Xawaadle Madar**
Wasiirka Wasaaradda Hawlaha Guud

## QAYBTA 1AAD

## NIDAAMKA GUUD

### Qodobka 1aad

Xeerkaan wuxuu nidaaminayaa Khidmadda ay Wakaaladda Hindihasa Soomaaliyeed ku qaadaneyso hawlaha la xiriira Hindisaha, qiimaynta, hubinta dhismooyinka, cabiraadda iyo talo bixinta ee lagu caddeeyey lifaaqyada la socda Xeerkan.

### Qodobka 2aad

Mashaariicda maalgelinteedu ay leedahay Dawladda Soomaaliyeed iyo Wakaaladaha Madaxa bannaan, Wakaaladda Hindisaha Soomaaliyeed waxay ka dhimaysaa Khidmadda kor ku xusan 25%.

### Qodobka 3aad

Khidmaddaasu waxay u kala baxaysaa seddexda nooc oo hoos ku qoran:

1. Mid ku xiran qiimaha guud ee mashruuca (Tariiffa Percentuale)

2. Mid ku xiran cabiraadda dhismaha (Tariiffa a quantita)

3. mid ku xiran waqtiga ay qaadato fulinta hawsha (Tariffa a Vacazione).

## QAYBTA IIAAD

## HAWLAHA INJINEERIYADDA

### Qodobka 4aad

Hawlaha Ingineerada oo ay Wakaaladdu ku xisaabtamayso khidmad ku xiran qiimaha guud waxay u kala qaybsan yihiin noocyada iyo darajooyinka soo socda:

I. DHISMOOYINKA MADANIGA AH, WARSHADAHA IYO KUWA LA XIRIIRA FANKA

1. Dhismooyinka Farsamadoodu ay tahay heer Sare oo ay ka mid yihiin: Dugsiyo waaweyn, Jaamacooyin, Bankiyo Hoteello, Shineemooyin iyo guryo.

2. Dhismooyinka Farsamadoodu ay tahay heer dhexe oo ay ka mid yihiin: Dugsiyo iyo Cisbitaalo yar yar.

3. Dhismooyinka farsamadoodu ay tahay caadi oo kala ah: Bakhaarro, Dhismooyin ku meel gaar ah.
4. Dhismooyin gaar ah ee la xiriira Fanka (Artistico e monumentale).
5. Dhismaha Shubka.
6 Dhismaha Shubka ee u baahan daraasad gaar ah.

**DHISMOOYINKA JIDADKA**

1. Dhismooyinka Jidadka Farsamadoodu ay tahay heer Sare ayna ku jirin hindisaadda. buntooyinka
2. Dhismooyinka Jidadka Farsamadoodu tahay caadi ayna ku jirin hindisaadda buntooyinka.

**III. DHISMOOYINkA LA XIRIIRA WARRABKA**

1 Dhismooyinka la xiriira waraabka loo isticmaalayo matoorada biyaha qaada.

2. Dhismooyinka la xiriira waraabka aan loo isticmaalaynin matoorada biyaha qaada.

**IV. DHISMOOYINKA LA XIRIIRA BIYACELINTA IYO BULAACADAHA MAGAALOOYINKA**

**V. DHISMOOYINKA U BAAHAN FARSAMO GAAR AH**

1. Buuntooyin
2. Biyaxireen
3. Dekado.

**VI. QALABAYNTA WARSHADAHA**

1. Warshadaha waaweyn
2. Warshadaha dhexe
3. Warshadaha yaryar.

**VII. QALABAYNTA LA XIRIIRTA XOOGGA KORONTADA**

Qodobka 5aad

Hawlaha ay qabaneyso Wakaaladda Hindisaha Soomaaliyeed waxay ka koobam yihiin :

b. diyaarinta hindisaha oo kooban (progetto sammario)

t. diyaarinta qiimaynta oo kooban (preventivo sommario)

j. diyaarinta hindisaha oo tifaftiran (Progetto esecutivo)

x. diyaarinta qiimaha tifaftiran (Preventivo Particolareggiato)

kh. diyaarinta naqshadaha tifaftirka dhismaha (Particolati costruttive)

d. diyaarinta faahfaahinta iyo heshiisyada dhismaha (capitolatt-contratti)

r. ilaalinta iyo kormeerka shaqooyinka (direzione e supervisione)

s. gacan ku siinta hubinta shaqooyinka mashruuca (assistenza collaudo)

sh. xisaab xiridda mashruuca (liquidazione).

## QAYBTA SADDEXAAD

## HINDISAHA MASHAARIICDA HANASHADA MASHAARIICDA

### Qodobka 6aad

Hawlaha ku qoran qodobka 4aad, haddii Wakaaladda hindisaha Soomaaliyeed ay u wada fuliso sida ku tifaftiran qodobka 5aad, waxay khidmadda ku qaadaneysaa qiimaha ku qoran lifaaqa (b)

### Qodobka 7aad

Wakaaladda Hindisaha Soomaaliyeed haddii ayan wada fulin qaybaha qodobka 5aad waxay qaadanaysaa qiimaha ku qoran lifaaqa «t» qaybta ay fulisay oo lagu kordhiyey 25%.

### Qodobka 8aad

1. Hubinta hawlaha mashaariicda waxay ku kooban tahay: baarinta, xaqiijinta tijaabada oo lagu hubinaayo in hawlaha dhismaha iyo wixii la xiriira ee la fuliyay ay waafaqsan yihiin hindisaha, faahfaahinta iyo heshiisyada dhismahaas.

2. Baarista iyo talo bixinta wixii dood ah ee ka taagan mashruucaas, iyo bixinta warqadda caddaynta hawlaha (certificato di collaudo).

### Qodobka 9aad

Haddii Wakaaladda Hindisaha Soomaaliyeed loo xilsaaro oo kaliya hubinta hawlaha mashruuca, waxay khidmad ahaan u qaadanaysaa lacagta lagu xusay lifaaqa «j».

### Qodobka 10aad

Haddii hubinta mashruuca layslagarto in loo baahan yahay talo farsamo yaqaan xirfad gaar ah leh, khidmaddaas waxaa toos u bixinaaya cidda loo samaynayo hubintaas.

### Qodobka 11aad

Diyaarinta qiimaha tifaftiran (Preventivo perticolareggiato) ee mashaariicda, Wakaaladda Hindisaha Soomaaliyeed waxay khidmad ahaan u qaadanaysaa lacagta ku xusan lifaaqa «x».

### Qodobka 12aad

Haddii qiimeynta ay tahay mid kooban (preventivo sommario), khidmadda la qaadanaayo waxay noqoneysaa tan ku qoran lifaaqa «x« iyadoo nus laga dhigayo.

### Qodobka 13aad

Diyaarinta jaangooyada laga samaynaayo cabbiraadda dhulka ka baxsan magaalooyinka ayna ku tilmaaman yihiin wixii dhismo, jidad, iyo webiyo, khidmadda waxaa loo xisaabinayaa sida soo socoto :

1. dhulka qiyaastiisu ay tahay ilaa toban ektar, khidmaddu waxay ku xirnaan doontaa waqtiga hawshaas laga qaadayo waa tan ku qoran lifaaqa «kh».
2. dhulka qiyaastiisu ka weyntahay 10 ektar, khidmadda laga qaadayo waa tan ku qoran lifaaqa «kh».

### Qodobka 14aad

Diyaarinta jaangooyada laga sameynaayo cabbiraadda dhulka ku yaala magaalooyinka oo ay ku tilmaaman yihiin dhismo guri, jidad, khidmadda loo xisaabinaayo waa sida soo socoto :

1. dhulka qiyaastiisu tahay ilaa shan ektar, khidmaddu waxay ku xirnaan doontaa waqtiga hawshaas lagu fulinaayo, iyadoo marka hore lagu heshiinayo,

2. dhulka qiyaastiisu ka weyn tahay 5 ektar, khidmadda laga qaadayo waxey noqoneysaa sida ku xusan lifaaqa «d».

### Qodobka 15aad

Diyaarinta jaangooyada leh cabbiraadda taagga (piani quotati), khidmadda loo xilsaaray waa sida hoos ku qoran:

1. Haddii jaangooyada ay tilmaameyso meelo kaliya (punti isolati), khidmadda laga qaadanayo waxay noqoneysaa tan lagu xusay qodobka 13aad oo lagu kordhiyey 40%.
2. Haddii jaangooyada tilmaameyso taagga dhulka oo dhan (curve di livello 1 - 5 m), khidmadda laga qaadanayo waa tan lagu xusay qodobka 13aad oo lagu kordhiyey 60%

3. Haddii cabbiraadda taagga loo sameynaayo jaangooyo jirta, khidmadda la xisaabinaayo waa sida hoos ku qoran:
 b. Jaangooyo caynka koowaad, khidmadda waxay noqonaysaa midda ku xusan qodobka 13aad oo laga dhimay 50%.
 t. Jaangooyin caynka labaad, khidmaddu waxay noqoneysaa midda ku xusan qodobka 13aad.

### Qodobka 16aad

Sameynta naqshadda guryaha dhisan, waxa khidmad ahaan laga qaadayaa lacagta ku xusan lifaaqa «r».

### Qodobka 17aad

Hawlaha ku saabsan tala-bixinta waxay noqon karaan kuwa soo socda :

1. Daraasadaha iyo baarista la xiriirta warshadaha, ganacsiga, dhaqaalaha xagga dhismooyinkooda iyo qalabayntooda.
2. Daraasadaha jaangooyada magaalooyinka
3. daraasadaha jaangooyada waraabka: hawlahaas waxaa lagu xisaabinaya waqtiga ay qaadato fulintooda.
4. ra'yi ka bixinta guud ahaan.

### Qodobka 18aad

Khidmadda fulinta hawlaha ku xusan qodobka 17aad, Wakaaladda Hindisaha Soomaaliyeed waxay khidmad ahaan u qaadaneysaa hawl kasta oo ay qabtaan farsamayaqaannadeeda sida soo socota :-

| | | | |
|---|---|---|---|
| 1. | Farsamayaqaan sare | Sh. So. 40 | Saacaddii |
| 2. | Farsamayaqaan | » 20 | Saacaddii |
| 3. | Kaaliye | » 10 | Saacaddii |

### Qodobka 19aad

Meesha fog Wakaaladda Hindisaha Soomaaliyeed iyo Hay'adda shaqada loo fulinaayo waa in ay ka heshiiyaan khidmadda, misaal ahaan: Tikitka Dayuuradda iwm.

## QAYBTA 4aad

## CABASHADA HAWLAHA WAKAALADDA

### Qodobka 20aad

1. Ciddii dooneyso in Wakaaladda Hindisaha ay fuliso hawl waa inay si qoraal ah ugu soo weydiisataa.

2. Wakaaladda Hindisaha waa inay diyaarisaa heshiiska la kala saxiixan doono oo ku sheegan hawsha la qabanaayo iyo khidmada lagu dallacaayo.

### Qodobka 21aad

Haddii uu dhaliilo loo-fuliyaha shaqada hawsha ay qabatay Wakaaladda Hindisha Soomaaliyeed wuxuu weydiisan karaa Wasiirka Wasaaradda Hawlaha Guud in uu magacaabo Guddi ka gaaro go'aan kama dambeys ah arrintaas ayadoo go'aankaas u hoggaansami doonaan labada dhinacba.

Weeydiishadaas waa in la hordhigaa Wasiirka Wasaaradda Hawlaha Guud muddo aan ka badneyn 30 beri laga bilaabo maalinta Wakaaladda Hindisaha ay ogeysiiso loo-fuliyaha shaqada in hawsha ku sheegan heshiiska la kala saxiixday ay wada fulisay.

## SHAXDA «B» - TABELLA «B»

| Qiimaha Dhismaha<br>Importo Opere | Dhismooyinka Madaniga<br>Costruzione Edilizia | | | | | | Dhismooyinka Jidadka<br>Costruzione Strade | | Dhis. Waraabka<br>Irrig. & Bonifica | |
|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|
| Sh. So. | I.1 | I.2 | I.3 | I.4 | I.5 | I.6 | II.1 | II.2 | III.1 | III.2 |
| 2.500 | 14,9 | 18,3 | 21,5 | 46,8 | 17,0 | 23,2 | 12,9 | 16,3 | 3,4 | 17,0 |
| 5.000 | 13,8 | 17,3 | 20,5 | 40,4 | 15,9 | 22,3 | 12,2 | 15,7 | 2,3 | 16,2 |
| 10.000 | 12,7 | 15,7 | 19,0 | 36,1 | 15,3 | 20,6 | 10,9 | 14,3 | 0,8 | 13,8 |
| 25.000 | 10,6 | 13,0 | 16,4 | 30,8 | 13,8 | 17,6 | 8,6 | 12,0 | 9,9 | 10,8 |
| 50.000 | 9,6 | 10,6 | 13,8 | 27,6 | 12,3 | 14,9 | 7,1 | 10,0 | 7,6 | 9,3 |
| 100.000 | 7,6 | 8,4 | 11,9 | 24,4 | 10,8 | 12,7 | 6,3 | 9,2 | 6,3 | 7,2 |
| 150.000 | 7,4 | 9,0 | 11,7 | 22,3 | 10,1 | 11,7 | 6,0 | 8,8 | 6,0 | 6,7 |
| 200.000 | 6,9 | 8,8 | 11,1 | 21,2 | 9,5 | 11,1 | 5,8 | 8,5 | 5,8 | 6,3 |
| 300.000 | 6,7 | 8,5 | 10,6 | 19,1 | 9,0 | 10,6 | 5,3 | 8,0 | 5,3 | 5,9 |
| 400.000 | 6,3 | 7,9 | 10,1 | 18,0 | 8,5 | 10,1 | 4,7 | 7,6 | 4,7 | 5,5 |
| 500.000 | 6,1 | 7,4 | 9,5 | 17,0 | 7,9 | 9,5 | 4,2 | 7,2 | 4,2 | 5,1 |

| | | | | | | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|
| 1.000.000 | 5,3 | 6,3 | 8,5 | 14,9 | 6,9 | 8,5 | 3,1 | 5,8 | 3,1 | 3,7 |
| 1.500.000 | 4,6 | 5,5 | 7,6 | 13,2 | 6,0 | 7,6 | 2,9 | 5,3 | 2,9 | 3,7 |
| 2.000.000 | 4,2 | 5,1 | 6,9 | 11,7 | 5,4 | 6,9 | 2,8 | 5,1 | 2,8 | 3,7 |
| 2.500.000 | 4,0 | 4,6 | 6,2 | 10,4 | 5,0 | 6,2 | 2,7 | 4,8 | 2,7 | 3,7 |
| 3.000.000 | 3,8 | 4,4 | 5,7 | 9,3 | 4,5 | 5,7 | 2,6 | 4,6 | 2,6 | 3,1 |
| 4.000.000 | 3,6 | 4,2 | 5,0 | 8,0 | 4,1 | 4,8 | 2,5 | 4,4 | 2,5 | 3,1 |
| 5.000.000 | 3,5 | 4,0 | 4,4 | 7,2 | 3,8 | 4,4 | 2,4 | 4,2 | 2,4 | 3,0 |
| 6.000.000 | 3,3 | 4,0 | 4,2 | 6,9 | 3,6 | 4,2 | 2,4 | 4,1 | 2,3 | 3,0 |
| 7.000.000 | 3,2 | 3,8 | 4,1 | 6,6 | 3,5 | 4,1 | 2,4 | 4,0 | 2,3 | 3,0 |
| 8,000,000 | 3,1 | 3,7 | 4,0 | 6,4 | 3,4 | 4,0 | 2,3 | 3,9 | 2,2 | 2,9 |
| 9.000.000 | 3.0 | 3,6 | 3,9 | 6,3 | 3,3 | 3,9 | 2,3 | 3,9 | 2,2 | 29 |
| 10.000.000 | 3,0 | 3,6 | 3,8 | 6,2 | 3,3 | 3,8 | 2,3 | 3,8 | 2,2 | 2,8 |
| 15.000.000 | 2,7 | 3,3 | 3,5 | 5,7 | 3,0 | 4,5 | 2,2 | 3,3 | 2,1 | 2,8 |
| 20.000.000 | 2,6 | 3,1 | 3,3 | 5,4 | 2,9 | 3,3 | 2,1 | 3,0 | 2,0 | 2,7 |
| 30.000.000 | 2,4 | 2,9 | 3,1 | 5,0 | 2,6 | 3,1 | 2,1 | 3,0 | 1,8 | 2,5 |
| 40.000.000 | 2,3 | 2,8 | 2,9 | 4,8 | 2,5 | 2,9 | 2,0 | 2,9 | 1,8 | 2,4 |
| 50.000.000 | 2,2 | 2,6 | 2,8 | 4,6 | 2,4 | 2,8 | 2,0 | 2,9 | 1,7 | 2,3 |

| Biyagelinta Bullacad. Acquedotti e fogniture | | Buuntooyin. biyaxir. & Dekedo Ponti, Dighe e Porti | | Qalab. Warshadaha Impianti Indus. | | Qa. X. Korontada Impianti elettrici | |
|---|---|---|---|---|---|---|---|
| IV | V.1 | V.2 | V.3 | VI.1 | VI.2 | V.I3 | VIII.1 |
| 18,3 | 17,0 | 21,5 | 24,8 | 26,6 | 37,2 | 47,9 | 21,2 |
| 17,3 | 16,2 | 20,4 | 23,5 | 21,2 | 29,8 | 38,3 | 17,0 |
| 15,7 | 13,8 | 19,0 | 22,0 | 18,3 | 25,5 | 34,0 | 14,4 |
| 13,0 | 10,8 | 15,9 | 18,8 | 13,8 | 19,3 | 25,5 | 11,0 |
| 10,5 | 8,5 | 13,2 | 15,7 | 10,6 | 15,3 | 20,4 | 8,5 |
| 9,1 | 7,1 | 11,9 | 14,0 | 8,5 | 11,9 | 15,7 | 6,8 |
| 8,7 | 6,7 | 10,8 | 13,4 | 7,4 | 10,4 | 13,4 | 5,9 |
| 7,5 | 5,9 | 10,2 | 12,1 | 6,9 | 9,6 | 12,4 | 5,5 |
| 6,9 | 5,5 | 9,7 | 11,3 | 6,3 | 8,9 | 11,4 | 5,1 |
| 6,3 | 5,1 | 9,3 | 10,6 | 6,0 | 8,5 | 10,9 | 4,8 |
| 5,3 | 4,0 | 7,2 | 8,5 | 5,3 | 6,3 | 9,5 | 4,2 |

| | | | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|---|---|
| 4,4 | 3,6 | 6,1 | 5,9 | 4,6 | 5,3 | 8,3 | 3,8 |
| 4,2 | 3,4 | 5,7 | 6,7 | 4,1 | 4,4 | 7,0 | 3,5 |
| 4,0 | 3,1 | 5,4 | 6,2 | 3,7 | 4,3 | 5,9 | 3,3 |
| 3,8 | 2,9 | 5,1 | 6,0 | 3,4 | 3,9 | 5,1 | 3,0 |
| 3,6 | 2,7 | 4,8 | 5,8 | 2,9 | 3,4 | 4,2 | 2,9 |
| 3,5 | 2,5 | 4,6 | 5,6 | 2,6 | 3,1 | 3,6 | 2,8 |
| 3,3 | 2,4 | 4,4 | 5,4 | 2,5 | 3,0 | 3,4 | 2,7 |
| 3,2 | 2,4 | 4,3 | 5,2 | 2,4 | 2,9 | 3,3 | 2,6 |
| 3,1 | 2,3 | 4,1 | 5,0 | 2,3 | 2,8 | 3,2 | 2,5 |
| 3,0 | 2,2 | 3,9 | 4,8 | 2,3 | 2,7 | 3,1 | 2,5 |
| 3,0 | 2,1 | 3,9 | 4,6 | 2,2 | 2,7 | 3,1 | 2,4 |
| 2,7 | 1,9 | 3,4 | 4,6 | 2,1 | 2,5 | 2,8 | 2,2 |
| 2,6 | 1,7 | 3,1 | 4,0 | 2,0 | 2,4 | 2,7 | 2,1 |
| 2,4 | 1,6 | 2,9 | 3,6 | 1,8 | 2,2 | 2,5 | 2,0 |
| 2,3 | 1,6 | 2,9 | 3,5 | 1,7 | 2,1 | 2,4 | 1,9 |
| 2,2 | 1,6 | 2,9 | 3,4 | 1,6 | 2,0 | 2,3 | 1,8 |

## SHAXDA « T » - TABELLA « T »

| Prestazioni<br>Qaybaha shaqada | Percentuali<br>Khidmadda |
|---|---|
| — Hindisaha oo kooban<br>Progetto di massima | 10 |
| — Qiimayn oo kooban<br>Preventivo sommario | 2 |
| — Hindisaha oo tifaftiran<br>Progetto esecutivo | 30 |
| — Qiimeyn tifaftiran<br>Preventivo particolereggiato | 10 |
| — Tifaftirka Dhismaha<br>Particolari costruttivi | 10<br>10 |
| — Faahfaahinta iyo heshiisyada<br>Capitolati e Contratti | 3 |
| — Kormeerka shaqooyinka<br>Direzione lavori | 27 |
| — Gacan ku siinta hubinta<br>Assistenza al collaudo | 3 |
| — Xisaab xiridda<br>Liquidazioni | 5 |

## SHAXDA « J » - TABELLA « J »

| Qiimaha Mashruuca<br>Importo delle opere | Khidmadda %<br>Tariffa % |
|---|---|
| 10.000 | 2,12 |
| 20.000 | 1,87 |
| 30.000 | 1,70 |
| 50.000 | 1,49 |
| 100.000 | 1,02 |
| 150.000 | 0,74 |
| 200.000 | 0,61 |
| 300.000 | 0,44 |
| 400.000 | 0,38 |
| 500.000 | 0,33 |
| 600.000 | 0,29 |
| 700.000 | 0,27 |
| 800.000 | 0,26 |
| 900.000 | 0,25 |
| 1.000.000 | 0,24 |
| 1.500.000 | 0,19 |
| 2.000.000 | 0,16 |
| 3.000.000 | 0,13 |
| 5.000.000 | 0,10 |
| Wixii ka badan<br>Importi maggiori | 0,10 |

## SHAXDA « X» - TABELLA « X »

| Qiyaas Qiimo Impor. stimato | Qaybta I Classe | Qayb. II Classe | Qayb. III Classe | Qayb. IV Classe | Qayb. V Classe | Qayb. VI Classe | Qayb. VII Classe |
|---|---|---|---|---|---|---|---|
| Qiyaas Qiimo Import. stimato | Qaybta I Classe | Qayb. II Classe | Qayb. III Classe | Qayb IV Classe | Qayb. V Classe | Qayb. VI Classe | Qayb. VII Classe |
| 2.500 | 36,1 | 19,1 | 19,1 | 21,2 | 25,5 | 36,1 | 27,6 |
| 5.000 | 23,8 | 12,5 | 12,9 | 13,8 | 16,3 | 23,8 | 17,0 |
| 10.000 | 19,1 | 11,4 | 11,0 | 12,5 | 15,3 | 19,1 | 13,6 |
| 25.000 | 15,5 | 9,5 | 8,7 | 10,4 | 12,7 | 15,5 | 11,0 |
| 50.000 | 11,9 | 8,0 | 7,4 | 8,5 | 10,6 | 11,9 | 8,5 |
| 100.000 | 9,5 | 7,4 | 5,7 | 7,2 | 9,5 | 9,5 | 6,8 |
| 15.000 | 8,9 | 7,0 | 5,3 | 7,0 | 8,7 | 8,9 | 5,3 |
| 200.000 | 8,3 | 6,8 | 5,1 | 6,6 | 8,5 | 8,3 | 5,9 |
| 300.000 | 7,6 | 6,3 | 4,6 | 5,9 | 8,0 | 7,6 | 5,5 |
| 400.000 | 7,2 | 6,1 | 4,4 | 5,5 | 7,8 | 7,2 | 5,1 |
| 500.000 | 6,8 | 5,7 | 4,0 | 5,1 | 7,4 | 6,8 | 4,8 |

## SHAXDA « KH » - TABELLA « KH »

| | | Dhul bannaan in Pianura | | Dhul taag ah in Collisa | | Dhul qarar ah in Collisa | |
|---|---|---|---|---|---|---|---|
| | | Taako Scala 1/1000 | Taako Scala 1/1000 | Taako Scala 1/2000 | Taako Scala 1/2000 | Taako Scala 1/1000 | Taako Scala 1/2000 |
| Dhul ay ku yaryihiin dhirta iwm. ektarkiiba | Shs. | 16,66 | 13,88 | 22,22 | 16,66 | 27,77 | 22,22 |
| **Terreni nudi e poco alberati per ettaro** | Shs. | | | | | | |
| Dhul leh dhir caadi ah iwm. ektarkiiba | Shs. | 22,22 | 19,45 | 27,77 | 22,22 | 33,33 | 27,77 |
| Terreni frastagliati da piantagioni per ettaro | Shs. | | | | | | |
| Dhul ay dhirtu ku badan tahay iwm. ektarkiiba | Shs. | 27,77 | 25,00 | 33,33 | 27,77 | 38,88 | 33,33 |
| Terreni a boschi per ettari | Shs. | | | | | | |

## SHAXDA « D » - TABELLA « D »

| | Dhul bannaan in Pianura | | Dhul taag ah in collina | | Dhul qarar ah in Montagna | |
|---|---|---|---|---|---|---|
| | Taako Scala 1/1000 | Taako Scala 1/2000 | Taako Scala 1/1000 | Scala Taako 1/1000 | Taako Scala 1/2000 | Taako Scala 1/2000 |
| Etarkiiba Per ettero | Sh. S0. 55,54 | Sh.S0. 44,45 | 66,65 | 55,54 | 83,32 | 66,65 |

## SHAXDA « R » - TABELLA « R »

| | Taakadda Naqshadda<br>Scala del Disegno<br>1/50 | 1/100 | 1/200 | 1/500 |
|---|---|---|---|---|
| 1. Jaangooyo - Pianta (Halkii mq. - al mq.) | | | | |
| — Guryo jaangooyadooda sahlan Sh. So.<br>Edifici con painta di semplice disposizione Sh. S0. | 0,29 | 0,20 | 0,16 | 0,08 |
| — Guryo jaangooyadooda aan sahlanayn Sh. So.<br>Edifici con pianti complicata Sh. So. | 0,70 | 0.54 | 0,41 | 0,25 |
| . Wajhadda - Prospetti (Halkii mq. - al mq.) , Sh. So. | 1,11 | 0,85 | 0,59 | 0,33 |
| 3. Jeexid - Sez. (Halkii Mk. al Mc.) Sh. So. | 0,06 | 0,05 | 0,04 | 0,03 |

XEER Madaxweynaha J.D.S. lam. yahay 63 ee 25/5/1978, Iskaashiga ka dhexeeya Wakaaladda Hindisaha Soomaaliyeed iyo Kulliyadda Injineeriyadda.

MADAXWEYNAHA

J. D. S.

ISAGOO ARKAY: Xaashida 1aad 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka.

ISAGOO ARKAY: Sharciyada lam. yihiin 17 18 19 ee 1da Luulyo 1976 kuna saabsan habka lagu dhisay Dawladda.

ISAGOO ARKAY: Sharciga lagu dhisay Wakaaladda Hindisaha Soomaaliyeed iyo nidaamka u degsan Kulliyadda Injineeriyadda.

ISAGOO AQOONSADAY: Inay tahay lagama maarmaan in la soo dejiyo Xeer nidaamiya xiriirka iyo Iskaashiga ka dhexeeya Wakaaladda Hindisaha Soomaaliyeed iyo Kulliyadda Injineeriyadda taasoo loogu dan leeyahay in wax wada qabsiga ka dhexeeya lagu fuliyo ujeeddooyinka waaweyn oo ay leeyihiin labada Ha'adood.

ISAGOO TIXGELINAYA: Talada ay soo jeediyeen wasiirka Hawlaha guud iyo kan Tacliinta Sare.

**WUXUU SOO SAARAYAA**

**XEERKA SOO SOCDA:**

**Qodobka 1aad**

Xeekaan wuxuu nidaaminayaa xiriirka iyo Iskaashiga xagga farsamada ee dhexmaray Wakaaladda Hindisaha Soomaaliyeed iyo Kulliyadda Injineeriyadda.

**Qodobka 2aad**

Ujeeddooyinka waaweyn oo nidaaminaaya xiriirka Iskaashiga ka dhexeeya Wakaaladda Hindisaha Soomaaliyeed iyo Kulliyadda Injineeriyada ee Qodobka 1aad lagu soo tilmaamay waa sida soo socota :

b) Soomaaliyeenta aqoonta farsamada Injineeriyada si loo gaaro isku-filnaasho.

t ) Ku dhiiri gelinta farsamayaqaannada Soomaaliyeed hawlaha Injineeriyada, daraasadda hindisaha mashaariicda laga sameynaaya Dalka si loogga kaaftoomo khubaraada shisheeyaha.

j) Xoojinta tababarka xagga farsamada ee ardayda kulliyada Injineeriyada si loo diyaariyo farsamayaqaanno Soomaaliyeed oo aqoon fiican u leh mashaakilka farsamada ee u gaar ah Dalka.

x) Kor u qaadidda heerka aqoonta farsamayaqaannada Wakaaladda Hindisaha Soomaaliyeed si ay ku sii takhasusaan laamaha kala duwan ee Injineeriyadda, lagana faa'iideysto aqoonta ay u leeyihiin mashaakilka farsamada ee u gaar ah Dalka.

kh) Daraasadda iyo baarista farsamada Injineeryadda ee la xiriira mashaariicda laga hirgelinaayo Dalka.

d) Horumarinta cilmi baarista iyo Farsamada Injineeryadda ee Dalka. Ujeeddooyinkaas waxaa gundhig u ah ujeeddada loo dhisay Wakaaladda Hindisaha Soomaaliyeed iyo Kulliyadda Injineeriyadda.

**Qodobka 3aad**

Xiriirka iyo Iskaashiga xagga Farsamada ee dhexmaraya Wakaaladda Hindisaha Soomaaliyeed iyo Kulliyadda Injineeriyadda wuxuu ka koobnaanayaa qaybahaan:

b) Wakaaladda Hindisaha waxay ka kaalmaynaysaa Kuliyadda Injineeriyadda tababarka xirfadeed ee Ardayda canta ku hayso.

t) Daraasadda, Hindisaha, Kormeerka mashaariicda dhismaha.

j. Wakaaladda Hindisaha, waxay u bandhigaysaa ardayda Kulliyadda Injineeriyadda daraasado ku saabsan mashaakil farsamo ee la xiriira hawlaha Wakaaladda Hindisaha oo u baahan baaris iyo tijaabo gaar.

x) Injineerrada Soomaaliyeed ee ka shaqeeya Wakaaladda Hindisaha waxay ka mid noqonayaan barayaasha Kulliyadda Injiyeeriyadda xagga maadooyinka farsamada (Materie applicative), iyadoo la dhowraayo xeerka u degsan Jaamacadda.

kh) Wakaaladda Hindisaha iyo Kulliyadda Injineerada waxay wada jir u sameynayaan Cilmi baaris lagu darso laguna xalliyo mashaakilka farsamada qaarkood sida tijaabada dhismooyin tusaala ah (Studio e prove su modelli.)

d) Wakaaladda Hindisaha iyo Kulliyadda Injineerada iyo Jeolojiyada waxay iska kaashanayaan horumarinta Cilmi Baaris iyo tijaabada la xiriirta Injineeriyadda sida Baarista iyo tijaabada alaabta dhismaha (Ricerche e prove sui materiali da costruzione).

**Qodobka 4aad**

Wakaaladda Hindisaha iyo Kulliyadda Injiyeeradda iyo tan Jeolojiyada waxay si wada jir ah u soo saarayaan natiijooyinka hadba laga gaaro darajada cilmi baarista iyo tijaabada ay wada jir u sameeyaan.

**Qodobka 5aad**

Fulinta Barnaamijka xiriirka iyo iskaashiga ku tifaftiran Qodobka 3aad waxaa wadajir si toos uga mas'uul ah Wakaaladda Hindisaha iyo Kulliyada Injiyeerada.

**Qodobka 6aad**

Wakaaladda Hindisaha iyo Kulliyadda Injineerada waxay isku kaashanayaan qalabka iyo kharashka lagu fulinaayo hawlaha ku xusan Qod, 3aad iyagoo wada isticmaalaya shaybaarada iyo qalabka tijaabada ay gaar u leeyihiin.

**Qodobka 7aad**

Xeerkaan waxaa lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda, wuxuuna dhaqan gelayaa taariikhda uu ku soo baxo.

(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)

Madaxwaynaha Jamhuuriyada Dim. Soomaaliya

Muqdisho: 25/5/1978

(J/le Axmed Ashkir Bootaan)

WASIRKA HIDAHA IYO T. SARE

(J/le Maxamed Xawaadle madar

WASIIRKA WASAARADDA H. GUUD.